Australian Government

Department of Home Affairs

# Information about DNA testing for visa and citizenship applicants

# Macluumaad ku saabsan baaritaanka DNA ee codsadayaasha fiisaha iyo dhalashada

Form **1259i SOM** SOMALI

## Wax ku saabsan DNA

DNA (Deoxyribonucleic acid) waa sheyga hiddo ahaaneed ee laga helo unug kasta oo jirkeena ka mid ah. tusaale ahaan, wuxuu ku jiraa dhiiga, candhuufta, maqaarka iyo timaha. Qof kastaa wuxuu leeyahay DNA. Qofku wuxuu ka dhaxlaa DNA-diisa isku darka waalidiintiis. Saa daraadeed, qaraabada isdhalay ama wada dhashay waxay wadaagaan DNA isku mid ah.

## Baaritaanka DNA

Baaritaanka DNA du wuxuu isbarbar dhigaa sheyga hiddo ahaaneed ee 2 ama dad ka badan si loo go'aamiyo inay bayoloji ahaan qaraabo yihiin. Sheyga hidaha ee la baarayaa badanaa waxaa laga soo qaataa afka ama saami dhiig.

## Maxaa codsadayaasha qaarkood loogula taliyaa inay maraan baaritaanka DNA

Wasaaradda Arimaha Gudaha (Wasaaraddu) waxay ansaxisay in baaritaanka DNA uu yahay xal keeni kara caddeynta xiriirka qoys ahaaneed ee bayolojiga. Badanaa qaababka kale ee caddeynta ah sida waraaqaha dhalashada ama buugta qoyska ayaa la heli karaa. Si kastaba ha ahaatee, baaritaanka DNA waa fursad faa'iido leh markaan laysku haleyn karin caddeynta dukumintiyadeed ee xiriirka bayolojiyadeed ama aan la heli karin.

Wasaaraddu waxay soo jeedin kartaa inaad marto baaritaanka DNA oo ah hab lagu caddeyn karo xiriirka bayolojiyadeed markayna wasaaradu ku qanacsaneyn caddeynta la hayo ee xiriirka la sheeganayo.

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad keento caddeynta xiriirka qoys ahaaneed si aad u fuliso shuruudan lagu bixinayo fiisaha ama dhalashada Awstareeliyaanka ee dadka is dhalay. Baaritaanka DNA wuxuu bixinayaa caddeynta xiriirka qoys ahaaneed ee la sheegtay, tusaale xiriirka waalid iyo ilmo ama wallaalo gabdho iyo wiilal ah.

## Baaritaanka DNA- gu ma aha mid khasab ah

Kuma khasbanid inaad marto DNA marka laguu soo jeediyo inaad isticmaasho.

Baaritaanka DNA-da sharci ahaan lagaama rabo. Waa nooc kale oo caddeyn ah; badanaa shahaadada dhalashada bedelkeeda la isticmaali karo. Haddii aad go'aansato inaad sameyso baaritaanka DNA, wasaaradu waxay bixisaa macluumaad ah sidee aad u sameyn lahayd baaritaankan oo fuliya shuruudaha wasaarada. Baaritaan kasta oo la qaado oo ka baxsan shuruudahaa waxaa laga yaabaa inaan la aqbalin.

Haddii aad go'aansato inaadan sameyn baaritaanka DNA, go'aan ku saabsan fiisahaaga ama codsiga dhalashada dadka isdhalay ama wada dhashay ayaa la gaari doonaa iyadoo la isticmaalayo macluumaadka ay hayso wasaaradu wakhtigaas.

## Kharashka baaritaanka DNA

Codsadayaasha fiisooyinka soogalootiga ama dhalashada Australia ee dadka isdhalay waa inay bixiyaan kharashka baaritaanka DNA oo dhan.

Wasaaradu waxay ka bixisaa kharashka baaritaanka DNA codsadayaasha fiisaha ee qaxootiga ah. si kastaba ha ahaatee, codsadayaasha Barnaamijka Bani'aadinimada khaaska ah ee la siiyo inay maraan baaritaanka DNA waa inay bixiyaan kharashka baaritaanka DNA oo dhan.

## La talinta

Waxaad ka raadsan kartaa la talin (tallo) aqoon yahan caafimaad ama dhakhaatiirta baaritaankan sameysa ka hor intaadan sameyn baaritaanka DNA. Waxaad sidoo kale raadsan kartaa ka dib marka jawaabaha DNA la ogaado.

**Ogow:** Adigaa ka masuul noqon doona bixinta wixii kharash ah ee ku baxaya wixii la tallin ah ee aad qaadato.

## Waxay sheegto natiijada baaritaanka DNA

Baaritaanka DNA ee waalid iyo ilmo waxay ku tuseysaa xiriirka bayolojiyadeed ee ka dhaxeeya.

Xaaladaha badidooda baaritaanka DNA wuxuu caddeeyaa xiriirka la sheegtay.

Mar marka qaarkood baaritaanka DNA ma bixiyo natiijo cad oo ah xiriirka ka dhaxeeya xubnaha qoyska. Haddii aysan jawaabtu caddeyn, shaybaarku wuxuu sharxi doonaa natiijada.

## Waxa loo isticmaalo natiijooyinka baaritaanka DNA

Natiijooyinka baaritaanada DNA ee loo soo gudbiyo wasaarada waxaa loo isticmaali doonaa si adag oo ah ujeedooyin socdaal oo keliya.

## Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan arimaha gaarka ah

*Privacy Act 1988 (Sharciga Arimaha Gaarka ah 1988)*.
Wuxuu ka kooban yahay 13 mab'da oo Xeer oo ah arimaha Gaarka ah ee Australia ee oo sharciyeeya sida Wasaaraddu ay u ururiso oo ay u maamusho macluumaadka shakhsiyeed. Macluumaadka ku saabsan sida Wasaaraddu u ururiso, isticmaasho oo ay u bixiso macluumaadka shakhsiyeed wixii ah shaqooyinkeeda muhiimka waxaa laga heli karaa foomka ah 1442i *Privacy notice (ogeysiinta arimaha gaarka ah)*. Macluumaad intaas ka sii badan oo ku saabsan siyaalaha ay u maareyso macluumaadka guud Wasaaraddu (oo uu ku jiro foomka 1442i) waxaa laga heli karaa qorshaha Arimaha gaarka ah ee Wasaaradda **https://www.homeaffairs.gov.au/access-and-accountability/our-commitments/privacy**

Shaybaarada baaritaanka DNA waa inay helaan ka raali ahaanshahaaga oo qoraal ah ka hor intayna siin natiijada baaritaanka DNA wasaarada ama qofka ku wakaashay.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arimaha gaarka ah iyo qarsoodiga ee natiijadaada baaritaanka DNA ee shaybaarka qaadaya baaritaankaaga DNA.

## Shaybaarada baaritaanada DNA

Haddii ay wasaaradu soo jeediso inaad sameyso baaritaanka DNA, waa inaad doorataa shaybaarka DNA ee ay ansixisay Hay'ada Baaritaanka ee Jamciyada Qaranka (NATA) ee loogu talagalay baaritaanka sharciga qoyska iyo oo ay weheliso macaamiisha baaritaanka lagu sameynayo wixii ka baxsan Australiya, ee fulin kara shuruuda Wasaaradda ee baaritaanka DNA marka loo eego caalamka.

**Ogow:** Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad dorato saamiga DNA cidda qaadeysa oo la aqoonsan yahay.

Eeg tallaabada 3 ee hoose ee sidaad u dooran karto shaybaarka baaritaanka DNA iyo tallaabada 5 ee hoose ee sidaad u dooran lahayd saamiga DNA cidda qaadeysa.

## Nidaamka baaritaanka DNA

Nidaamka baaritaanka DNA wuxuu ku lug leeyahay tallaabooyinkan soo socda:

1. Wasaarada ayaa kuu soo direysa warqad ay kuu soo jeedineyso inaad marto baaritaanka DNA. Warqada ayaa ku siineysa macluumaadka ku saabsan baaritaanka DNA, nidaamka baaritaanka DNA iyo sidii aad u dooran lahayd shaybaarka baaritaanka DNA iyo cidda qaadeysa saamiga DNA.
2. Waad go'aansaneysaa haddii aad dooneyso inaad sameyso baaritaanka DNA. Waxaad ka raadsan kartaa la tallin aqoon yahan caafimaad ama dhakhaatiirta sameysa baaritaankan haddii aad jeceshahay, laakiinse tani waxay noqon doontaa kharash jeebkaaga ah.

   Haddii **aadan** go'aansan in aadan sii wadin sameynta baaritaanka DNA, wasaaradu waxay go'aan ka gaareysaa codsiga fiisaha ama dhalashada dadka is dhalay iyadoo ku saleynaysa macluumaadka ay helayso wakhtigaas.


© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2005

3. Haddii aad go'aansato inaad sii wadato baaritaanka DNA, waa inaad doorataa shaybaarka DNA ee ay ansixisay Hay'ada Baaritaanka ee Jamciyada Qaranka (NATA) ee loogu talagalay baaritaanka sharciga qoyska iyo oo ay weheliso macaamiisha baaritaanka lagu sameynayo wixii ka baxsan Australiya, ee fulin kara shuruuda Wasaaradda ee baaritaanka DNA marka loo eego caalamka. Si aad u heshid shaybaar:
   - Gal website ka NATA ee **www.nata.com.au/accredited-facility**
   - Si aad u raadisid shaybaarada baaritaanka ee la aqoonsan yahay, geli erayada 'Baaritaanka Waalidnimada' ee 'Furaha' Daawada raadinta ka dibna guji batoonka'RAADI' iyo
   - La xiriir shaybaarka aad dooratay si aad u hubisid in shaybaarkaasi uu awood u leeyahay inuu raaco shuruuda Wasaarada.

     **Ogow:** Shaybaarka waa laguu doori doonaa haddii aad tahay codsadaha Fiisaha qaxootiga.
4. Markaad doorato shaybaarka baaritaanka DNA, waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto shaybaarkaas si aad u sameysato ballan iyo inaad shaybaarka la sameysato sidii aad u bixin lahayd kharashka baaritaanka DNA.

   Waxaa taas weheliya, waxaad u baahan doontaa inaad ka jeegareyso shaybaarka haddii aad u baahan tahay inaad adigu u soo dirto foomka 1528 *DNA qaadista ee caddeynta Dhaarta* iyo foomka 1527 *DNA Qaadista warqada Kore* iyaga si ay u dhammeystiraan, saxiixaan una gudbiyaan foomamka xafiiska ay khuseyso ee fiisaha ka shaqeynaya. Foomka 1528 iyo foomka 1527 waxaa laga helayaa website ka Wasaaradda ee ah **www.homeaffairs.gov.au/allforms**

   **Ogow:** Haddii aad baaritaanka ku mariyeysid bannaanka Australiya, waxaa laga yaabaa inaadan u baahan inaad u dirto warqada dhaarta shaybaarka si ay u buuxiyaan oo u saxiixaan haddii wasaaradu leedahay nidaam jira oo la xiriira warqada dhaarta ee shaybaarkaas gaarka ah.
5. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad dooratid cidda qaadaysa saamiga DNA oo aad siisaa faahfaahinta xiriirka shaybaarka baaritaanka DNA si ay sameeyaan nidaamkii loo qaadi lahaa saamiga. Si aad u dooratid cidda qaadaysa saamiga DNA:
   - Haddii aad Australiya bannaankeeda joogtid – xafiiska fiisaha bixinaya ee dibeda ee khuseeya waa inuu haddeertaba kugu siiyey liiska cidda qaada saamiga ee degaankan loo ansixiyey baaritaanka DNA warqada lagugu ogeysiinayo oo aad ka dooran karto; ama
   - Haddii aad joogto Australiya – waxaad u baahan doontaa inaad doorato xarunta qaadista saamiga ( ama, xaallado meeshii aysan jirin xarunta qaadista saamiga oo dhow, dhakhtarka guud) ee Australiya ee qancin kara shuruuda wasaarada ee ujeedooyinka sharciga qoyska ee saamiga DNA.
6. Haddii aadan hadaba sameyn, shaybaarka ayaa ka dib kuugu soo diraya qalabka baaritaanka saamiga iyo, haddii la rabo, warqada dhaarta oo buuxda saxiixana si toos ah:
   - Haddii aad Australiya debada ka joogtid – Fiisaha ama xafiiska codsiga dhalashada. (Iyadoo ku xiran shuruudaha degaankaas, si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inay jiraan wakhtiyo qalabka saamiga iyo warqada dhaarta oo saxiixan si toos ah loogu diro cidda saamiga DNA qaadeysa ee aad dooratay); ama
   - Haddii aad joogtid Australiya – cidda qaadeysa saamiga DNA ee aad dooratay.
7. Shaybaarka baaraya DNA ayaa ka dib kula soo xiriiraya si uu kuula sameysto wakhti uu kaaga qaado saamiyada adiga iyo kuwa kale ee DNA laga baarato. Saamiyada waxaa badanaa laga qaadaa wax afka lagaa marinayo ama dhibic dhiig ah.

   Wakiilka wasaarada **waa inuu** joogaa marka laga qaadayo saamiyada dhammaan cidda bixineysa ee Australiya dibadeeda jooga. Wakhti wakhti, saamiyada laga qaado dadka bixiyana Australiya gudaheeda iyaa sidoo kale u baahan doona in markhaati laga noqdo.

   Baaritaanada DNA ee aan fulin shuruudaha wasaarada waxaa laga yaabaa inaan la aqbalin. (natiijada baaritaanka DNA ee sharci ahaan laga aqoonsan yahay Australiya waxaa laga yaabaa inay noqoto mid la aqbali karo.)
8. Wakhtiga la qaadayo saamiga DNA, waxaad u baahan doontaa inaad buuxisid oo aad saxiixdid foomka 1526 *DNA Qaadista caddeynta Ka raali aahaanshaha* oo laga heli karo website ka Wasaaradda (oo aad sidoo kale lagaa rabo inaad qaadato si aad u tusto qaadaha saamiga DNA). Qoraalka ka raalli ahaanshahu waa in lagaa helo ka raalli ahaanshahaaga si natiijada baaritaanka DNA –gaaga loo sheego Wasaarada. Qof kasta oo laga qaadayo saamiga waa inuu buuxiyaa caddeynta ka raalli ahaanshaha wakhtiga saamiga laga qaadayo oo uu siiyaa:
   - Haddii aad Australiya dibedaada joogtid – markhaatiga Wasaarada, oo u soo diri doona caddeynta ka raalli ahaanshaha oo buuxda, iyo saamiyada, shaybaarka baaritaanka DNA ee ay khuseeyso (ogow, kiisas dhif ah, waxay noqon doontaa saami qaadaha qofka tan sameyn doona); ama
   - Haddii aad Australiya joogtid, oo uusan jirin markhaatiga Wasaaradu – qaadaha saamiga DNA ee u soo diri doonta caddeynta ka raali ahaanshaha oo buuxa iyo saamiga, shaybaarka baaritaanka DNA ee ay khuseyso.

   Natiijada baaritaanka DNA waxaa loo soo diri doonaa adiga iyo sidoo kale wasaaradaba, waxaana ay badanaa diyaar noqonayaan 14 maalmood laga bilaabo maalinta shaybaarku helo dhammaan saamiyada.
9. Haddii natiijada baaritaanka ee DNA ay muujiyaan xiriir bayolajiyeed oo aan la filaynin (tusaale, baaritaanka waalidnimadu inuu meesha ka saaso bixiyaha 'waalid' ahaan), waxaa laga yaabaa inaad qaadato la tallin. Dhakhtar ka mid ah kooxda dhakhaatiirta ah ee aydoortay Dawlada Australiya ayaa awoodi doona inuu ku siiyo la talintan, laakiinse waxaad u baahan doontaa inaad bixiso kharashka adeegan.

   **Ogow:** Haddii aad u baahan tahay adeegyadan oo aan weli lagaala talin sidii loola xiriiri lahaa dhakhtarka ka mid ah dhakhaatiirta la doortay, waxaad heli kartaa faahfaahinta xafiiska codsiga ee bixinaya fiisaha ama dhalashada ee ay khuseyso ee wasaarada.

## Ku akhri macluumaadkan afaf kale

Macluumaadkan waxaa sidoo kale lagu heli karaa afafkan soo socda:

- Amxaarig
- Carabi
- Daari
- Faransiis
- Haka Chin (Gobolka Chin – Burma)
- Kurdish (Kurmanji)
- Kurdish (Sorani)
- Shiineys (La sahlay)
- Soomaali
- Tagalog
- Fiyetnaamiis

## Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka DNA

Haddii adiga ama qaraabadaada laydin weydiiyo inaad martaan baaritaanka DNA oo aad qabto su'aalo dheeraad ah, ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka DNA, fadlan la xiriir xafiiska wasaarada ee idiin soo jeediyey baritaanka ama gal website ka **www.homeaffairs.gov.au**

| | |
|---|---|
| *Bogga Internetka (Home Page)* | **www.homeaffairs.gov.au** |
| *Khadka weydiimaha guud* | Wac **131 881** saacadaha shaqada Australiya gudaheeda si aad ula hadashid shantaraalka (macluumaad duuban baa jira saacadahaas wixii ka baxsan). Haddii aad Australiya bannaankeeda jirto, fadlan la xiriir safaaradda Australiya ee kuugu dhow. |


© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020